Somaliska/Af-soomaali

# Haddii natiijada shaybaarka laga qaaday *lagu xaqiijiyo* påvisad in cudurka [Covid-19] u kugu dhacay

Haddii natiijada shaybaarka laga qaaday *lagu xaqiijiyo* ”Påvisad” macneheedu waxaa weeyaan in cudurka [Covid-19] u kugu dhacy.

**Haddii la xaqiijiyo in cudurka [Covid-19] u kugu dhacay waxaa muhim ah in laga fekero tallaabooyinkii aad ka qaadi lahayd**

Markii natiijada shaybaarka laga qaaday lagu xaqiijiyay in cudurka [Covid-19] u kugu dhacay, waxaa muhim ah inaad ka fekerto sidii aad dad kale cudurka ugu badbaadi lahayd, taasoo ku suurtagelin karto adigoo guriga iska joogto. Tan kale waa inaad tixgelisa qodobada ku xusan Sharciga amniga cudurrada faafa [Smittskyddslagen]. Xiriiriyehaan ka aqriso warbixin ku saabsan fayruus is-qaadsiinta iyo qodobada waajib kugu ah inaad tixgeliso: Warbixin loogu talagalay qofka adigoo kale ah oo lagu xaqiijiyay in uu cudurka [Covid-19] ku dhacay.

# Haddiise natiijada shaybaarka laga qaaday *aan lagu xaqiijin* ej påvisad in u cudurka [Covid-19] kugu dhacay

Haddii natiijada shaybaarka *aan lagu xaqiijin* "Ej påvisad" in u cudurka [Covid-19] usan kugu dhicin, macneheedu waxaa weeyaan in dhigga shaybaarka laga qaaday, laga waayay fayruuska sababa cudurka, waxaana ku noolan kartaa noolol caadi ah kaddib markii calaamadaha ay ciribtirmaan oona gebi ahaan caafimaad wanaag aad dareemayso.

Haddii cudurka dartiisa aad sii darsato, khadka taleefanka kula xiriir *1177 Vårdguiden* ama la xiriir rugta daryeel-caafimaadeedka ee aad ka tirsan tahay. Haddii halista noolasha ay jirto wac 112.

Haddii natiijada shaybaarka laga qaaday lagu xaqiijiyo in dhiiggaaga laga helay fayruus, waxaa dhici karto in natiijada ay noqoto waxkamajiraan [Negativ] oo aan sax ahayn, waa haddii shaybaarka laf ahaantaada iska qaaday u ahaa qabyo. Macneheedu waxaa weeyaan in iyadoo sidaasi tahay haddana u cudurka [Covid-19] kugu dhacay. Sidaas awgeed, waxaa muhim ah inaad guriga iska joogto ilaa gebi ahaan aad caafimaad wanaag ka dareento.

# Haddii natiijada shaybaarka laga qaaday *aan la qiimayn karin* ej bedömbar

Haddii natiijada shaybaarka laga qaaday *aan la qiimayn karin* ”Ej bedömbar” macneheedu waxaa weeyaan, in lagu guuldarraystay falanqaynta natiijada shaybaarka. Sababta waxay noqon karta dhacdo ka dhacday goobta shaybaarka ama ay jirtay cillad dhinaca farsamada.